



Dugsiyada Dadweynaha Denver

SHURUUDAHA KA QALIN-JABINTA DUGSIGA SARE

Shahaadada dibloomaha dugsiya sare ee ay abaal-marin ahaan u bixiyaan Dugsiyada Dadweynaha Denver waxay u dhigantaa heerka tayada sare ee uu manhajka ka koobmo, waxbarashada, iyo aqoonta ardeyga, waana in lagu sii wadaa sida dukumeenti ka turjumaya dadaalka badan ee ardeyga iyo degmada dugsiya ee loogu sii diyaargaroo waya shaqada dumidda ama tacliin sare.

Shuruudaha Kooraska Waxbarashada Guud ee La Isku-daray ama KooraskaGuud

Labo boqol iyo afartan saacado simistar (24 cutub) ayaa laga doonayaa ardeyda si ay uga qalin-jabiyaan dugsiya sare ayna u helaan shahaadada dibloomaha dugsiya sare. Darajo-qoraaleedyada waa in ay ka turjumaan farqiga waxa uu barnaamijka ka koobmo. Dibloomaha Guud ee La Isku-daray ilaa 140 saacado simistar ayaa lagu heli karaa kooras Waxbarasho Gaar ah maado kastoo la barto. Shuruudaha maadada cilmiga gaarka ah waxay ku qoran yihiin liiska hoos:

Shuruudaha Kooraska Waxbarashada Guud ee Dibloomada		
Kooraska	Simistar	Carnegie
Kooraska	Dhibcooyin	Cutub
1. Barashada Naxwaha Luuqadda – Ugu yaraan afartan saacado simistar (4 cutub) ayaa la qaadanayaa oo ay ka mid yihiin toban saacado simistar (1 cutub) oo ah horudhaca Suugaanta iyo Qoraalka curisyada 1 iyo 2 iyo toban saacado simistar oo Suugaanta Mareykanka ah 1 iyo 2. Toban saacado simistar (1 cutub) oo Suugaanta Caalamka ah, ama kooraska qaybta qoraalka sare ah. Toban saacado simistar (1 cutub) oo Barashada Aadaabta kale ee Luuqadda ah.	40	4.0
2. Xisaab –Afartan saacado simistar (4 cutub) waa in la qaataa. Toban saacado simistar (1 cutub) oo ah Xisaabta aljabrada ama isku-keenideeda ee isbed-le'eg (algebra or its integrated equivalent), toban saacado simistar (1 cutub) oo xisaabta joomatariga ah ama isku-keenideeda ee isbed-le'eg (geometry or its integrated equivalent) ayaa loo baahan yahay, toban saacado simistar (1 cutub) oo Aljabra 2 ama isku-keenideeda ee isbed-le'eg (algebra or its integrated equivalent), iyo toban saacado simistar (1 cutub) oo ah heer ka sareeya aljabra.	40	4.0
3. Saynis –Soddon saacado simistar (3 cutub) waa in la qaataa: Ardeyda waxaa laga doonayaa in ay dhammeeyaan 30 saacado simistar (3 cutub) oo dhibco saynis ah, 20 saacado simistar (2 cutub) waa in ay ka yimaadaan Sayniska Dhulka Bayoloji, Kimistari, ama Fiisikis.	30	3.0
4. Cilmiga Bulshada –Soddon saacado simistar (3 cutub) waa in la qaataa. Toban saacado simistar (1 cutub) oo ah Taariikhda Mareykanka, Shan saacado simistar (5 cutub) oo ah Barashada Habka Dowladda ay u Shaqeyso iyo Shacabka iyo shan-iyo-toban saacado simistar (1.5 cutub) oo ah cilmiga bulshada kale.	30	3.0
5. Waxbarashada Ciyaaraha Jirdhiska/Qoob-kaciyaar, Citywide Marching Band, ROTC ,ama Ciyaaraha Fudud ee DPS –Toban saacado simistar (1 cutub)waa in la qaataa ama laga cafiyaa ka qaybgalka ciyaaraha fudud.	10	1.0
Maadooyinka Aan Khasabka Ahayn ee La Dooran Karo –Sagaashan saacado simistar (9 cutub) waa in laga qaataa Waxbarashada Aan Khasabka Ahayn ee La Dooran Karo –Afartan saacado simistar (4 cutub) 10 saacado simistar (1 cutub) oo Farshaxan ah kuwaasi oo ka mid ah suugaan, qoob-kaciyaar, ruwaayad, iyo muusig, ama Waxbarashada Farsamada iyo Shaqo. Toban saacado simistar (1 cutub) oo ah waxbarashada aan khasabka ahayn ee la dooran karo, kuwaasi oo ka mid ah Ingiriis/Cilmiga Bulshada oo La Dooran Karo, Luuqadaha Caalamka, AVID, Gear-Up iyo koorsooyinka AP/IB.	90	9.0
Kuwa Kale oo Aan Khasab Ahayn ee La Dooran Karo – 240 saacado simistar (24 cutub) ee la isaga baahan yahay qalin-jabinta gudahooda, 50 saacado simistar (5 cutub) ayaa loo heli karaa kuwa aan khasabka ahayn ee la dooran karo, barnaamij aan khasab ahayn ee la dooran karo oo balaaran ayaa lagu bixiyaa maadooyinka manhajka ee aasaasiga ah. Waxaa intaa siidheer, in ardeyda ay dooran karaan kuwa la dooran karo ee suugaanta, ganacsiga/suuq-geynta, waxbarashada qoyska iyo macmiilka, luuqad ajnabi, tiknoolajiyada warshadaha, muusig, waxbarashada ciyaaraha jirdhiska/qoob-kaciyaar, ama bixinyo gaar ah.		
Khibradaha ku saleysan-beesha – 240 saacado simistar (24 cutub) ee la isaga baahan yahay dibloomaha gudahooda, ugu yaraan 220 saacado simistar (22 cutub) waa in lagu qaataa waxbarasho fasalka ku-saleysan. Ardeyda, sidaasi awgeed, waxaa laga yaabaa in ay ka qaataan ayna adeegsadaan ugu badnaan labaatan saacado simistar (2units) oo ah khibrad ku saleysan-beesha ee shuruudaha qalinjabinta. Khibradaha waxaa ka mid ah balse aanan ku xaddidnayn khibradaha adeegga ama laanta cilmiga, khibradaha shaqo, iyo tababarasho.		
Isu-geyn	240	24.0

SHURUUDAHA KA QALIN-JABINTA DUGSIGA SARE EE DUGSIYADA DADWEYNAHA DENVER

Fasalka 2011 iyo 2012

Xog Guud

Dhibcooyinka Dugsiga Sare laguma qaadan karo dugsi dhexe. Tusaale: Ardey ku soo dhammeystay Aljabra 1 dugsi dhexe, waa in wali uu ku qaataa 4 sano oo xisaab ah dugsiga sare.

Ka-cafinta

Ciyaaraha fudud oo ay ansixiyeen Guddiga Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Denver ee gaarsan aasaasyada hoose waxaa laga yaabaa in ay arday ka cafiyaan ka qalin-jabinta waxbarashada ciyaaraha jirdhiska ee la isaga baahan yahay. Wax darajo ama dhibco ah laguma bixinayo ka qaybgalka ciyaaraha fudud ka-cafintana noocaas ahna wax kama dhimayso tirada guud ee saacadaha la isaga baahan yahay si loo qaato diblooma. Waxbarashada ciyaaraha jirdhiska ee la isaga baahan yahay labada simistar waxaa laga yaabaa in looga cafiyo ka qaybgalka ciyaaraha fudud.

Aasaaska hagaya ka-cafinta waxbarashada ciyaaraha jirdhiska:

- Ardeyga waa in uu sii wadaa u-qalmitaanka waxbarasho gebi ahaan xilliga.
- Hal xilli ciyaareed oo dhammeystiran ayaa loo baahan yahay si ardey looga cafiyo shan saacado simistar (5 cutub) oo ah Waxbarashada Ciyaaraha Jirdhiska ee la isaga baahan yahay.
- Ardeyga waa in uu ahaado ardey ku cusub dugsiga sare, ardey ku jira sannadka labaad, ama ardey ku jira sannadka seddaxaad si uu ugu qalmo ka-cafinta. Ardeyda ku jira sannadka afaraad ee aan wali ka soo bixin waxbarashada ciyaaraha jirdhiska ee la isaga baahan yahay looma oggola ka-cafintan waana in ay isku qoraan kooras waxbarashada ciyaaraha jirdhiska ah.

Shahaadada dibloomaha dugsiga sare ee Dugsiyada Dadweynaha Denver waxay caddaynaysaa in ardey uu ka soo baxey dhammaan shuruudaha mid ka mid ah shanta qaybood ee kooraska:

- Kooraska Waxbarashada Guud
- Kooraska Waxbarashada La Cayimay*
- Isku-darka Guud*
- Khibradda Shaqo iyo Waxbarasho*
- Diblooma ASCENT (Dedejinta Ardeyda Ayadoo Loo Marayo Isqoritaan Waafaqsan)

Xogta Dheeraad ah ee Khuseysa Shuruudaha

Ardeyda aan lagu qanci karin ama qayb ahaan aad u yaqaana xisaabta iyo wax qoridda ama akhirnta CSA labo jeer ayaa la xannibayaa inta lagu guda jiro fasalkooda sannadka 9^{aad}, iyo xaaladaha qaar fasalkooda sannadka 10^{aad}. Fasalkan dheeraadka ah ee xannibaadda waxaa loo qaadayaa dhibic waxbarashada aan khasabka ahayn ee la dooran karo.

Ardeyga wuxuu isku diiwaan gelin karaa 70 dhibcooyinka saacadaha ah, (35 dhibcood simistar kasta) inta lagu guda jiro sannad-dugsiyeedka caadiga ah. Xadeynta waxaa loo kordhin karaa ilaa 80 dhibcood, (5 dhibcood oo dheeraad ah simistar kasta) oo leh fasax gaar ah oo laga qaato maamulaha dugsiga.

- Tirada ugu badan ee dhibcooyinka ardeyga uu ku heli karo dugsiga xagaaga waa 10 saacado simistar.

Layliyada Qalin-jabinta

Si ay ugu qaybqaataan layliyada bilowga ah fasalkooda, ardeyda waa in ay dhammeystiraan in le'eg 240 saacado siminar waana in ay sidoo kale dhammeystirtaan dhammaan fasalada la isaga baahan yahay dhammaanka sannadkooda afaraad.

Ardeyda Badelka ah

Ardeyga badelka ah ee ka yimid dibadda Dugsiyada Dadweynaha Denver waa in uu ka soo baxaa shuruudaha looga qaadanayo shahaado diblooma Dugsiyada Dadweynaha Denver. Dhammaan shuruudaha qalin-jabinta waa in laga soo baxaa kahor qalin-jabinta, oo ay ka mid tahay dhigashada Dugsiyada Dadweynaha Denver ugu yaraan labo simistar, oo leh ugu yaraan 50 saacado simistar (5 cutub) oo dhibcooyin la qaata ah.

Ardeyga Hadalka Sagootinta Jeediya/Ardeyga gala heerka labaad

Celceliska dhammaan siddeedka siminar ayaa loo isticmaalayaa in lagu go'aamiyo ardeyga hadalka sagootinta jeediya/ardeyga gala heerka labaad ee dugsi kasta. Ardeyda waa in ay ku qornaadaan dugsiga ay dhigtaan ugu yaraan seddax (3) sannadood waana in ay ku guulgaaraan darajada ugu sareysa ee celceliska fasalka ay ka qalin-jabinayeen si ay ugu qalmaan ayna u noqdaan ardeyga hadalka sagootinta ah jeediya / ardeyga gala heerka labaad ee fasalka.

Heerka Darajada ee Lagu Kala Sooco Ardeyda	
60 saacado simistar 120 saacado simistar 170 saacado simistar 240 saacado simistar	Ardeyga Sannadka Labaad Ardeyga Sannadka Seddaxaad Ardeyga Sannadka Afaraad Ku Abaal-mari Diblooma



Dugsiyada Dadweynaha Denver

SHURUUDAHA KA QALIN-JABINTA DUGSIGA SARE

Khibradda Shaqo iyo Waxbarasho

Shahaadada dibloomaha dugsiya sare ee ay abaal-marin ahaan u bixiyaan Dugsiyada Dadweynaha Denver waxay u dhigantaa heerka tayada sare ee uu manhajka ka koobmo, waxbarashada, iyo aqoonta ardeyga, waana in lagu sii wadaa sida dukumeenti ka turjumaya dadaalka badan ee ardeyga iyo degmada dugsiya ee loogu sii diyaargarowya shaqada dumida ama tacliin sare.

Shuruudaha Khibradda Shaqo iyo Waxbarasho

Labo boqol iyo afartan saacado simistar (24 cutub) ayaa laga doonayaa fasalada 9, 10, 11 iyo 12, iyo/ama ilaa simistarka ugu horreeya ee kadib maalinta dhalashada kow-iyo-labaatanaad (21st) ee ardeyga, ee la qaatey koorsooyinka oo uu ansixiyay maamulaha dugsiya oo ayna go'aamiyeen kooxda shaqaalaha. Darajo-qoraaleedyada waa in ay ka turjumaan farqiiga waxa uu barnaamijka ka koobmo. Shuruudaha maadada cilmiga gaarka ah iyo waxbarashada shaqo waxay ku qoran yihiin liiska hoos:

Shuruudaha Dibloomaha Khibradda Shaqo iyo Waxbarasho	Saacado Simistar Loo Baahan yahay?	Cutubka Carnegie Loo Baahan yahay?
<i>Kooras</i>	<i>Dhibcooyin</i>	<i>Cutub</i>
SHURUUDAHA Khibradda Shaqo iyo Waxbarasho (WES)		
Barashada Naxwaha Luuqadda – Ugu yaraan afartan saacado simistar (4 cutub) ayaa la qaadanayaa.	30	3.0
Cilmiga Bulshada –Labaatan saacado simistar (2 cutub) ayaa la qaadanayaa. Toban saacado simistar (1 cutub) oo fasalo xirfado iyo/ ama isbadel ah ayaa loo baahan yahay.	20	2.0
Saynis –Toban saacado simistar (1 cutub) waa in la qaataa.	10	1.0
Xisaab –Labaatan saacado simistar (2 cutub) waa in la qaataa.	20	2.0
Waxbarashada Ciyaaraha Jirdhiska/Qoob-kaciyaar, Citywide Marching Band, ama ROTC –Toban saacado simistar (1 cutub) waa in la qaato; haddii uu cayimay IEP mooyane.	10	1.0
Farshaxanka: Muusig, Suugaan, Ruwaayad ama CTE –Toban saacadood (1 cutub) oo Farshaxan ah kaasi oo ka mid ah suugaan, qoob-kaciyaar, ruwaayad, iyo muusig.	10	1.0
Waxbarashada Aan Khasabka Ahayn ee La Dooran Karo –Toban saacado simistar (1 cutub) waxbarasho la dooran karo ah, taasi oo ka mid ah Af Ingiriis/Cilmiga Bulshada Oo la dooran karo, koorsooyinka Waxbarashada Farsamo iyo Shaqo, AVID, Gear-Up, iyo koorsooyinka AP/IB.	10	1.0
Xirfado –Toban saacadood (1 xiisad) oo xirfado ayaa loo baahan yahay.	10	1.0
Kuwa Kale oo Aan Khasabka Ahayn ee La Dooran Karo – 240 saacado simistar (24 cutub) ee la isaga baahan yahay qalin-jabinta gudahooda, 50 saacado simistar (5 cutub) ayaa loo heli karaa kuwa aan khasabka ahayn ee la dooran karo, barnaamij aan khasab ahayn ee la dooran karo oo balaaran ayaa lagu bixiyaa maadooyinka manhajka ee aasaasiga ah. Waxaa intaa siidheer, in ardeyda ay dooran karaan kuwa la dooran karo ee suugaanta, ganacsiga/suuq-geynta, waxbarashada qoyska iyo macmiilka, luuqad ajnabi, tiknoolajiyada warshadaha, muusig, waxbarashada ciyaaraha jirdhiska/qoob-kaciyaar, ama bixinyo gaar ah ee waxbarasho gaar ah oo lagu xiray khibrad shaqo.	60	6.0
Khibradda shaqada-ku saleysan –240 saacado simistar (24 cutub) ee la isaga baahan yahay dibloomada gudahooda, ugu yaraan 60 saacado simistar (6 cutub) waa in lagu qaataa Khibradda Shaqada-ku saleysan (Barnaamij WES)	60	6.0
SHURUUDAHA KOORASKA WAXBARASHADA LA CAYIMAY		
Shuruudahan waxay ka koobnaayaa kooraska waxbarashada ama waxay badelayaan heerka manhajka/waxa uu ka koobmo oo ay ansixiyeen Guddiga Waxbarashada. Ee gaaridda go'aanada loogu talagalay helidda diblooma, aaladaha qiimeynta ayaa la dooranayaa waana la maamulayaa si loo habsado in marka qiimeynta lagu maamulo ardey leh dhimanaansho dareenka, wax gacmo laga sameeyo, ama xirfadaha hadalka, natiijooyinka imtixaanka waxay dhab ahaantii ka turjumayaan awooda dabiiciga ah ee xaga aqoonta ee ardeyga ama heerka guulgaaridda intii ay ka turjumi lahaayeen dhimanaanshaha dareenka, wax gacmo laga sameeyo ama xirfadaha hadalka ee ardeyga.		
1) Ardeyda leh xaalado naafonimo qotodheer ama daran ee soo faragelinaya awooda ay ku gaarayaan shuruudaha Midkood koorsooyinka kor ee waxbarasho ee qanciya shuruudaha midkood Barnaamijka Waxbarashada Qofka U Gaarka ah Waa in ay ka qalin-jabiyaan dibloomada dugsi sare.		
2) Ardeyda waa in ay u soo xaadiraan si joogto ah fasalada 9,10,11, iyo 12, iyo/ama ilaa siminarka ugu horreeya kadib maalinta dhalashada kow-iyo-labaatanaad ee ardeyga sida uu go'aamiyay IEP.		
ISU-GEYN	240	24.0

*Ikhtiyaaraadka Kooraska La Isku-daray ee Guud, Kooraska Waxbarashada La Cayimay, iyo Khibradda Shaqo iyo Waxbarasho waxaa kaliya heli kara ardeyda Leh baahiy waxbarasho gaar ah oo la aqoonsadey ama ardeyda darajo-qoraaleedyadooda ka turjumaya hal ama in ka badan waxbarashada aasaasiga ah ama dhibcaha kooraska aan khasabka ahayn ee loo dooran kara sida waxbarasho gaar ah ahaan. Kooraska waxbarashada ardeyga lagama turjumayo diblooma gaar ah, balse waxay ka doorbidayaan darajo-qoraaleedka ardeyga. Shahaadada dibloomada ardey kasta waxay xusaysaa, "Dibloomadan waxay ka turjumaysaa kooraska waxbarasho ee ardeyda sida lagu diiwaangeliyay darajo-qoraaleedka rasmiga ah."

Ugu yaraan afar sannadood (siddeed simistar) oo dhigasho ah ayaa laga doonayaa ardeyda si ay u dhammeystirtaan fasalada 9, 10,11, iyo 12, marka laga reebo :

- Ardeyda haysata 3.0 GPA ee dhammeystay dhammaan manhajka aasaasiga ah / maadada aan khasabka ahayn ee la dooran karo ee la isaga baahan yahay iyo 240 saacado siminar (24 cutub) waxay ku qalin-jabin karaan toddobo siminar.
- Ardeyda haysata 3.5 GPA oo dhammeystay dhammaan manhajka aasaasiga ah/maadada aan khasabka ahayn ee la dooran karo ee la isaga baahan yahay iyo 240 saacado siminar (24 cutub) waxay ku qalin-jabin karaan lix siminar.

Ardeyda Naafonimada leh

Kooraska waxbarasho ee soosocda waxaa loo isticmaali karaa in lagu qaato dibloomada Dugsiyada Dadweynaha Denver:

- Ardeyda naafonimada leh ee ka soo baxa shuruudaha *Kooraska Guud ee Waxbarashada* waa in uu helo Dibloomada *Dugsiyada Dadweynaha Denver*.
- Ardeyda naafonimada leh ee ka soo baxa shuruudaha *Kooraska Waxbarashada Guud ee La Isku-Daray* waa in uu helo *Dibloomaha Dusiyada Dadweynaha Denver*.
- Ardeyda naafonimada leh ee ka soo baxa shuruudaha *Barnaamijka Khibrada Shaqo iyo Waxbarasho* waa in uu helo *Dibloomaha Dugsiyada Dadweynaha Denver*.
- Ardeyda leh xaalado naafonimo qotodheer ama daran ee soo farageliya awoodda ay kaga soo baxayaan shuruudaha midkood kooraska waxbarasho ee kor ayna qanciyeen shuruudda Kooraska Waxbarasho ee La Cayimay waa in ay qaataan *Dibloomaha Dugsiyada Dadweynaha ee Denver*.

La xiriir la taliyaha ilmahaaga ama macalinka waxbarashada gaarka ah ee loogu talagalay shuruudaha Kooraska Waxbarasho ee

go'an. Kooraska waxbarasho ee uu dhammeeyay ardeyga waxaa lagu muujinayaa darajo-qoraaleedka rasmiga ah ee ardeyga.

Shahaadada Dhigashada

Ardeyda sida joogtada ah u dhigata dugsiga balse aanan ka soo bixin shuruudaha kooraska waxbarasho ee mid kastoo ka mid ah seddaxda kooras ee la barto waxaa lagu abaalmarin karaa Shahaado Dhigasho.

Xog Guud

Dugsiyada sare, barnaamijyo gooni ah ayaa loo aasaasay ardeyda. Waa in ay noqoto mas'uuliyad wadajir ah ee dugsi, ardey, iyo waalid kasta si loo siiyo feejignaan taxadar badan leh yoolalka shaqada iyo waxbarasho ee ardeyga. **Dhinaca La Sheegay ee Xooga La Saarayo:** Ardey kasta, inta lagu guda jiro simistarka koowaad ee sannadkiisa/sannadkeeda seddaxaad, wuxuu sheegi doonaa "dhinaca xoogga la saarayo." Ardeyga wuxuu u baahanayaa in uu ka qaybqaato ugu yaraan 1.0 cutub oo waxbarasho ah, oo ka baxsan shuruudda qalin-jabinta, ee maado cilmi gaar ah (balse muhiim ma aha in ay ka baxsanaato 240 saacado simistar ee loo baahan yahay), waana in ay sameeyaan wax qabadka aqoontiisa/aqoonteeda oo muujinaya labaduba qotodheerida iyo fahanka waxbarasho eena ka hadlaya ulajeedka adeegsiyiisa/adeegsiyeeda fahanka noolasha kadib dugsiga sare.

Dhibcooyinka Dugsiga Sare lagama qaadan karo dugsi dhexe. Tusaale: Ardey ku soo dhammeystay Aljabra 1 dugsi dhexe, waa in wali ku qaataa 4 sano oo xisaab ah dugsiga sare.

Ka-cafinta

Ciyaaraha fudud oo ay ansixiyeen Guddiga Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Denver eena gaarsan aasaasyada hoose waxaa laga yaabaa in ay arday ka cafiyaan ka qalan-jabinta waxbarashada ciyaaraha jirdhiska ee la isaga baahan yahay. Wax darajo ama dhibco ah laguma bixinayo ka qaybgalka ciyaaraha fudud ka-cafinta noocaas ahna wax kama dhimayso tirada guud ee saacadaha la isaga baahan yahay si loo qaato dibloomaha. Waxbarashada ciyaaraha jirdhiska ee la isaga baahan yahay labada simistar waxaa laga yaabaa in looga cafiyo ka qaybgalka ciyaaraha fudud.

Aasaaska hagaya ka-cafinta waxbarashada ciyaaraha jirdhiska:

- Ardeyga waa in uu sii wadaa u-qalmitaanka waxbarasho gebi ahaan xilliga.
- Hal xilli ciyaareed oo dhammeystiran ayaa loo baahan yahay si ardey looga cafiyo shan saacado simistar (5 cutub) oo ah Waxbarashada Ciyaaraha Jirdhiska ee la isaga baahan yahay.
- Ardeyga waa in uu ahaado ardey ku cusub dugsiga sare, ardey ku jira sannadka labaad, ama ardey ku jira sannadka seddaxaad si uu ugu qalmo ka-cafinta. Ardeyda ku jira sannadka afaraad ee aan wali ka soo bixin waxbarashada ciyaaraha jirdhiska ee la isaga baahan yahay looma oggola ka-cafintan waana in ay isku qoraan kooras waxbarashada ciyaaraha jirdhiska ah.